

## Dookhyada Tababarka Macaamiisha

\*Tababarka kasta waxaa loo qoondeeyay 2 saacadood

Si aad u mudeysato tababarkaaga  
adeegso lifaaqaan:

<https://qrco.de/bduloV>

Ama iskaanka mari koodhka QR



SCAN ME

Cinwaanka Tababarka	Sharaxaada
<b>Tababarada Taageerada Dabeecada</b>	
Tusmada Dabeecada ee Jawiga Wanaagsan	Hagista dabeecada ayadoo haddana la ilaalinaayo jawiga wanaagsan ee fasalk ayaa noqon karta talaabo isku dheelitir leh. Macalimiin badan ayaa ka walwalsan qaabka dhabta ah ee "jawi wanaagsan" u yaalo iyo sida looga dhaqan gelin karo fasal ay dhigtaan ilmo dabeecado qalafsan. Casharkaan waxaan kaga hadli doonaa waxa ay ka dhigan tahay in jowi wanaagsan laga abuuro fasalka, sida eexdu u saamayso fikirka macalinku ka haysto dabeecada, waxaan ka doodi doonaa erayada "dabeecada khaladka ku dhacda iyo dabeecad xumada kasta ah," waxaana fahmi doonaa qaababka looga falceliyo walaacyada dabeecada.
Wax ka badan Raali Gelinta afka: Kobcinta Miyirka ayadoo la adeegsanaayo Tusmada iyo Afar Talaabo oo lagu Bixiyo Raali Gelin Qalbiga Kasoo go'day	Ma tahay inaan u sheegno carruurta inay qofka raali gashaan xataa haddii aysan qalbiga ka oran? Anagoo adeegsanayna khudbad, dood, iyo muuqalo, waxaan ka doodi doonaa su'aashaan waxaana baran doonaa waxa miyirku yahay iyo sida loo kobciyo. Waxaan sidoo kale akhrin doonaa afar talaabo oo lagu Bixiyo Raali Gelin Qalbiga Kasoo go'day waxaana fahmi doonaa sida looga falceliyo xaalad ka imaan karta fasalka anagoo adeegsanayna waxa aan doonayno inaan uga doodno dhammaan tababarka.
Sideen Ku Caawin Karaa? Dib u eegista Maareynta Dhaqanka	Aragtida is-xukunka waxay siisaa macallimiinta fikrardo cusub oo ku saabsan dhaqanka fasalka oo kordhiya ka-qaybgalka carruurta, kor u qaada dareenka wanaagga carruurta, oo u horseeda habab korriineed oo wanaagsan. Iyadoo la fulinayo baahiyaha carruurta ee madaxbannaanida, xiriirk, iyo kartida waxay u muuqan kartaa mid aan waafaqsanayn dhaqamada baahsan qaarkood—ama si fudud aan loo kala hormarin marka la tixgelinayo doorashooyinka maareynta dabeecadda—samaynta isbeddello yaryar oo waqtii ka dib si loo daboolo baahiyahaas waxay u oggolaanaysaa macallimiinta inay si wax ku ool ah u taageeraan dhammaanba ilmo. Mararka qaarkood, kaliya waxay qaadataa su'aasha "Sideen ku caawin karaa?" si macalinka lagu saaro dariiqa ugu wanaagsan ee lagu maareeyo hab-dhaqanka carruurta.
Fahanka Aasaaska Dabeecada	Dabeecadaha Qalafsan ayaa badanaa ka dhasha baahiyoo aan la daboolin. Xog badan ka ogoow muuhimada baahiyaha dhanka bulsho/dareenka ee carruurta, iyo waxa aad samayn karto si aad u buuxiso baahiyahaas. Marka baahiyaha lagu haqabtiyo xariirada leh aasaaska adag, carruurta ayaa lahaan doonta ciladaha dabeecada oo intii hore kayar waxayna diyaar u ahaan doonaan waxbarashada.

Si aad u mudeysato tababarkaaga  
adeegso lifaaqaan:

<https://qrco.de/bduloV>

Ama iskaanka mari koodhka QR



SCAN ME

## Dookhyada Tababarka Macaamiisha

\*Tababarka kasta waxaa loo qoondeeyay 2 saacadood

Cinwaanka Tababarka	Sharaxaada
<b>Tababarada Macalinka/Maamulka</b>	
Dhisida Goob Shaqo oo Ka caagan Isir nacaybka	Casharkaan wuxuu diirada saarayaa abuurista iyo joogtaynta goob shaqo ayagoo si qoto dheer u fahmaaya sinaanta isirka iyo mawduucyada eexda kuwaasoo muujin kara si wanaagsan farsamooyinkeena kahortaga isir nacaybka. Mawduucyada ayaa u dhexeeya, kartida dhaqanka, isir nacaybka, dabeecadaha xun, iyo kaladuwanaanta iyo isku dhafnaanta ayadoo la adeegsanaayo farsamooyin iyo habab ku dhisan cadayn.
Maaraynta Fasalka	Inta lagu jiro kulankaan, adeeg bixiyaasha ECE ayaa qorshayn doona qorshaha maamulka fasalka oo qaas ah ahna mid balaaran, ayna ku jiraan xeerarka erayo wanaagsan loo adeegsaday, habraacyo, xeeladaha maalgashiga, iyo qorshaha maamulka dabeecada.
Hirgelinta Manhaj Degdeg ah	Agaasimayaasha iyo macallimiintu waxay baran doonaan taariikhda iyo aasaaska falsafada Manhajka Degdeggaa ah iyo sida loo hirgeliyo manhajka fasalkooda iyo guud ahaan barnaamijkooda waxbarashada hore.
Ka adkaanta Daalka Naxariista: Ka hadlida Daal-shaqada Macalinka	Daryeelida carruurta, waxbaridda iyo daawashada iyaga oo baranaya oo koraan waxay noqon kartaa mid aad u qanacsan, laakiin sidoo kale waxay kugu keeni kartaa waxyeello adiga. Tababarkan waxaad ku baran doontaa sababaha iyo calaamadaha daalka naxariista iyo talooyin ku saabsan sida looga hortagi karo inuu kugu dhaco.
Hogaamin Adkeysi leh oo loogu talagalay Agaasimeyaasha iyo Kormeereyaasha Daryeelka Carruurta	Tababarkaan waxaa loo sameeyay agaasimayaasha daryeelka carruurta iyo kuwa kormeeraya shaqaalahaa kale. Wuxaan ka hadli doonaa farqiga u dhexeeya hogaamiye caadi ah iyo hogaamiye adkaysi leh, waxyaabaha shaqaalahaa iyo hogaamiyaashu u baahan yihiin inay adkaysi u yeeshaan, iyo sida hogaamiyaashu ku hormarin karaan adkaysiga.

## Dookhyada Tababarka Macaamiisha

\*Tababarka kasta waxaa loo qoondeeyay 2 saacadoo

Si aad u mudeysato tababarkaaga  
adeegso lifaaqaan:

<https://qrco.de/bduloV>

Ama iskaanka mari koodhka QR



SCAN ME

Cinwaanka Tababarka	Sharaxaada
<b>Tababarada Sinaanta iyo Wadajirka</b>	
Abuurista Goob Waxbarasho oo aan Eex lahayn	Maxaa looga jeedaa kahortaga eexda maxayse muhiim u tahay in la helo goob waxbarasho oo aan eex lahayn? Waxaan ka doodi doonaa su'aalahaan waxaana aqoonsan doonaa xeeladaha kahortaga eexda oo loo adeegsan karo xaruntaada waxbarashada dhalaanka. Kani waa tababarka heerka biloowga ah. Dhammaan waa lagu casuumayaa (haddii aad horay u abuurtay goob waxbarasho oo ka caagan eexda aadna doonayso in dib u eegis lagu sameeyo, ama haddii aad doonayso inaad ka fakarto sida loo sameeyo talaabadaas aadna uga hadasho muhiimadeeda). Waxaan sugaynaa inaan mawduucaan muhiimka ah ka doodno.
Sinaanta Fasalka Isku Dhafan	Fasallada isku dhafan ayaa u baahan caawimaado si loo daboolo baahida gaarka ah ee carruurta. Tababarkaan ayaa xalinaaya farqiga u dhexeeya sinaanta iyo fikirka cadaalada, iyo sida caawimaad looga gaysto baahiyaha badan ee kaladuwaa. (Tababarkaan waxaa loo sameeyay bixiyaasha u adeegaaya carruurta naafada ah).
Kobcinta Goob Ku Haboon dhammaan Jinsiyada	Tababarka heerka dhexe ah ayaa diirada saaraaya aqoonsiga jinsiga ilmaha, eray bixinta muhiimka ah ee jinsiga iyo hormarinta isku dhafnaanta jinsiyada ee barnaamijkaaga waxbarashada ubadka.
Muraajacada Fulinta Waxbarashada ka Caagan Eexda: Sanadaha Hore	Waxaan bilaabi doonaa casharkeena anagoo daawanayna filinka "Muraajacada Fulinta Waxbarashada ka Caagan Eexda: Sanadaha hore," taasoo lagu sameeyay deegaanka, kadib wada sheekaysi la fududeeyay halkaas oo aan raacayno muuqaalka, khibradaheena iyo sida aan u sii wadi karno shaqadaan muhiimka ah ee ka caagan eexda, iyo kahortaga isir -nacaybka. Xog ku saabsan filinka: "Muraajacada Fulinta Waxbarashada ka Caagan Eexda: Sanadaha hore," waa mid kamid ah afar filin oo ku guulaystay aqoonsiga Northwest Regional Emmy® qayb cusub oo la xiriirta Kala Duwanaanta, Sinaanta, iyo Wadajirka.

## Dookhyada Tababarka Macaamiisha

\*Tababarka kasta waxaa loo qoondeeyay 2 saacadood

Si aad u mudeysato tababarkaaga  
adeegso lifaaqaan:

<https://qrco.de/bduloV>

Ama iskaanka mari koodhka QR



SCAN ME

Cinwaanka Tababarka	Sharaxaada
<b>Tababarka Diirada-saarista dhallaanka</b>	
Xog ku Saabsan Dhammaan ACEs	Fadlan nagusoo biir dood ku saabsan Dhammaan Aces. Wuxaan ka hadli doonaa qeexida kahortaga dhacdooyinka khatar gelinaaya ilmaha iyo aqoonsiga aces ka shaqsiga ah. Marka xigta, waxaan ka hadli doonaa sida Aces ay u saamayn karto kobaca ilmaha. Macalimiinta iyo qoysaska ayaa heli doona farsamo aqooneed oo ku aadan sida loo taageero ilmaha leh Aces.
Qaabka Dareenka Bulshanimo ee Loo waajaho Qaniinyada	Fadlan nagusoo biir anagoo fahan qoto dheer ka qaadanayna fahanka qaabka dareenka Bulshanimo ee loo xaliyo qaniinyada. Qaniinyada ayaa ku dhalisa dareenno badan qof kasta oo door ku leh waana habdhaqan caadi u ah ilmaha dhashay iyo saddex jirada. Inta lagu jiro waqtiga aan isla joogno waxaan diirada saari doonaa sababaha faraha badan ee keeni kara qaniinyada, qaababka la iskudajiyo loona dhaga nuglaado marka ay dhacdo, iyo xeeladaha ku aadan sida looga falceliyo. Ayadoo la adeegsanaayo khubbad, muuqaal, iyo doodo, ka qaybgalayaashu waxay fahmi doonaan su'aalaha iyo xirfadaha ku hagi doona abuurista qorshe talaabo iyo la hadlida qoysaska.
Kobcinta xididada Qoto dheer ee Dhallaanka iyo socod baradka iyada oo loo Adeego oo Soo noqo	Fadlan nagu soo biir annagoo si qoto dheer u dhex-geli doona samaynta xididdo qoto dheer anagoo adeegsanayna daryeel-siiin jawaabis-og. Cilmi baaristu waxay hadda muujisay habka ugu wanaagsan ee lagu kobciyo horumarka maskaxda ee caafimaadka qaba iyo aasaas bulsho-dareen caafimaad leh waa isdhixgalka loo yaqaan "u adeego oo soo noqo". Inta lagu jiro wakhtiga aan wada joogno waxaan diirada saari doonaa siyaabaha lagu aqoonsan karo, kor loogu qaadayo, oo aan u taageerno horumarka bulsho-dareenka carruurta iyada oo loo marayo is-dhexgalka uu ilmuhi hoggaamiyo. Iyada oo loo marayo muxaadaro, muuqaalo, iyo dood kooxeed yar iyo dhaqdhaqaqyo, ka qaybgalayaashu waxay awood u yeelan doonaan inay aqoonsadaan oo ay qeexaan tusaalooyinka adeegga iyo soo noqoshada. Ugu dambeyntii, kaqeybgalayaashu waxay dib u eegi doonaan.

Si aad u mudeysato tababarkaaga  
adeegso lifaaqaan:

<https://qrco.de/bduloV>

Ama iskaanka mari koodhka QR



SCAN ME

## Dookhyada Tababarka Macaamiisha

\*Tababarka kasta waxaa loo qoondeeyay 2 saacadood

### Cinwaanka Tababarka

### Sharaxaada

#### Tababarada Hormarinta Guud ee Ilmaha

<i>Hordhaca Taxanaha Hab-dhaqannada Ugu wanaagsan: Isdhexgalada</i>	<p>Tababarkaan heerka biloowga ah, waxaan ku baran doonaa xeeladaha ugu haboon ee macalimiinta la shaqaynaaya carruurta si keli ah, koox ahaan, iyo ayagoo la jooga ilmaha kale ee facood ah. Wuxaan eegi doonaa isdhexgallada kor u qaada maamulka nafta waxaana bixin doonaa tilmaamaha horudhaca ah si loo adeegsado maalin kasta. Wuxaan ka doodi doonaa qaababka loo kobciyo la hadlida carruurta ka baxsan dugsiga xarunta, hadal ahaan iyo la ciyaarida ilmaha intaba.</p>
<i>Hordhaca Taxanaha Hab-dhaqannada Ugu wanaagsan: Xisaabta iyo Sayniska</i>	<p>Casharkaani waxa uu soo bandhigi doonaa hababka ugu fiican ee bixinta waxbarashada xisaabta iyo sayniska ee xarumaha daryeelka carruurta. Anagoo adeegsanayna natijjooyin ku salaysan cilmi baaris ka qaybgaleyaasha waxay sahamin doonaan khibradaha xisaabta iyo sayniska ee goobaha waxbarashada ubadka, sida agabka kobcinta iyo isdhexgallada tayada leh ee ilmaha iyo dadka waawayn ay u taageerayaan hormarinta xisaabta dhammaan maalinta. Wuxaan sidoo kale bixin doonaa farsamooyinka xirfada xisaabta iyo sayniska ee aasaasiga ah oo taageeraaya waxbarashada mustaqbalka.</p>
<i>Hordhaca Taxanaha Hab-dhaqannada Ugu wanaagsan: Jadwalada iyo Kala Guurka</i>	<p>Ka qaybgalayaasha ayaa aqoonsan doona kuna dabiqi doona aqoonta qaababka ugu fiican ee jadwallada iyo kala guurada. Ka guurida hal shaqo oo loo wareego shaqo kale ayaa dhib ku noqon karta carruurta iyo Dadka waawayn, halka hawlaho joogtada ah ay muuqan karaa kuwo marax ah oo caajis badan. Kula shaqaynta carruurta isdhexgallo macno badan ayaa kor u qaadi kara waxbarashada ilmaha, hoos u dhigaaya dabeecadaha Qalafsan, korna u qaadaaya wax soo saarka xarumaha barbaarinta ubadka. Kaalay oo arag sida aad isdhexgallo awood badan ula samayn karto carruurta inta lagu jiro jadwallada iyo kala guurada.</p>
<i>Barashada Tilmaamaha Hormarinta Waxbarashada Dhalaanka ee Gobalka Washington</i>	<p>Tababarkaan waxaa lagu baranayaa/lagu muraajacaynayaa Tilmaamaha Hormarinta Waxbarashada Dhalaanka (ELDGs) ee Gobalka Washington iyo sida ay u taageerayso hormarinta ilmaha ee muhiimka ah.</p>
<i>Ciyaarta Banaanka oo Badqab iyo Firfircooni leh</i>	<p>Nagusoo biir anagoo aqoonsanayna qaababka lagu abuuri karo nashaadaad firfircooni ee meelaha bannaanka iyo sidoo kale aan dib u eegayno shuruudaha ciyarta banaanka ee la xariirta WAC-ga iyo aalada ERS. Wuxaan sidoo kale ka hadli doonaa naqshadaha si hormarin dheeri ah loogu sameeyo aagaaga ciyarta ee banaanka.</p>

## Dookhyada Tababarka Macaamiisha

\*Tababarka kasta waxaa loo qoondeeyay 2 saacadood

Si aad u mudeysato tababarkaaga  
adeegso lifaaqaan:

<https://qrco.de/bduloV>

Ama iskaanka mari koodhka QR



SCAN ME

Cinwaanka Tababarka	Sharaxaada
<b>Tababarada Hormarinta Guud ee Ilmaha</b>	
Taageerida Ardayda barta Labada Luuqadood	Marka ay sameeyaan tababarka, ka qaygalayaashu waxay fahmi doonaan xeeladaha taageerada fasalka ee ardayda barta labada luuqadood, sida looga hadlo walaacyada iyo faa'idooyinka labada luuqadood, hanaanada carruurta, waxayna aqoonsan doonaan moodhelka iyo sida loo dhiso luuqada. Haddii aad la shaqeyso carruurta baranaaya wax ka badan hal luuqad aadna dooneyso inaad caawiso, tababarkaan adiga ayuu kugu habboon yahay!
Naqshada Khibrada Qaybta	Waa inaad ka qaybgashaa labada cashar ee saacadaha STARS Casharkaan qaybta 2 ""Fanka Khibrada"" waxaan baranaynaa Fanka Goobaha Waxbarashada Dhalaanka, waxaan ka doodaynaa Hormarka iyo Wax soos aarka fanka, badqabka fanka waxaana dulmari doonaa xogta anagoo kaashanayna kaqaybgeleyaasha. Waa sidoo kale ka hadli doonaa sida Fanku ula shaqaynaayo Tusmooyinka Waxbarashada Dhalaanka ee Washington. Waa siin doonaa ka qaybgaleyaasha fikradaha sida loogu dabaqo fanka barnaamijkaaga waxayna baran doonaan fikrado ku aadan sida loo abuuro bandhigyada fahnka iyo dhinacyada famak ee goobtaada.
Awoodda Ciyaarta	Ciyaartu waa waxa ay carruurtu rabaan inay sameeyaan iyo waxay doortaan inay sameeyaan marka la siiyo xorriyadda, madaxbannaanida, waqtiga iyo goobta si ay u go'aamiyaan dabeecadahooda. Ciyaartu waa sida carruurtu u bartaan adduunkooda. Ciyaartu waa xaq ubadka waana nuxurka caruurnimada. Ciyaartu maaha wax lagu raaxaysto; Waa lama horaan. Baro sababta ciyaartu ay muhiim ugu tahay horumarka ilmaha iyo siyaabaha aad uga caawin karto waxbarashadooda.